



Galmudug State
Office of the President

Xeer Madaxweyne Lr.38

Tr.24-06-2021

Ansixinta Miisaaniyadda 2021.

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

Markuu Arkay: Qodobka 50^{aad} faqraddiisa 12^{aad} ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Galmudug;

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha sharci dajinta Galmudug ee lambarkeedu yahay XGBGM: 0034/2021 ee soo baxday taariikh 24/06/2021 kuna saabsaneyd ansixinta Miisaaniyadda 2021 iyo xeerarka kale ee la xiriira Maamulka Maaliyadda & Uruurinta Dakhliga;

Markuu Tixgaliyey: Baahida loo qabo in la dardar galiyo hawlaha Maaliyadeed ee Dowladda Galmudug;

Wuxuu Soo Saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

1. Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug wuxuu ogolaaday ansixinta Miisaaniyadda 2021 iyadoo si habsi leh ugu idmaday dhaqan-gelinteeda Wasiirka Maaliyadda si waaqsan Sharciyada Maamulka Maaliyadda Dadweynaha, Xeerka Dakhli Uruurinta iyo Xeerka Lagu Dhisay Wasaaradda Maaliyadda ee 2018.

Qodobka 2aad

1. Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug.

**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug
Mudane, Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)**

